



Macluumaadka Eegitaanka Ijaarashada



Ijaarashada Seattle guadheeda Xaquuqda, Masuuliyada, Khayraadka

Ijaartayaashu waxay xaq u leeyihiin inay:

- Ku noolaadaan guryo nabadgelyo leh oo si wanaagsan loo dayactiro
- Ka badbaadaan midabtakoorka iyo ka aargoosiga
- Helaan ogaysiin ku habboon kahor inta aanay oggolaan in loogu soo galo guriga
- Ka badbaadaan ka saarista sharci darada ah
- Helaan ogaysiis qoraal ah markii wax laga bedalo heshiiska ijaarka

Ijaartayaashu waxay masuul ka yihiin inay:

- Bixiyaan ijaarka
- Aanay jajabin hantida
- Raacaan sharuudaha heshiiska ijaarka
- Siiyaan u ogolaansho soogelidda macquulka ah milkilaha hantida iyo maamulaha

Ka eeg macluumaad dheeraada oo ku saabsan Xaquuqda iyo Masuuliyadda Ijaarte ahaan:

www.seattle.gov/rentinginseattle

Nagala soo xariir



WEBSITE-KA
www.seattle.gov/RRIO



TELEFOONKA
(206) 684-4110



TTY
7-1-1 ama (206) 233-7156



QOF AHAAN ama BOOSTADA
700 Fifth Avenue, 20th Floor
PO Box 34234
Seattle, WA 98124-1234

Noocyo La Turjinaanay ayaa la heli kara

Amharic (አማርኛ) • Cambodian/Khmer (ភាសាខ្មែរ)
Chinese (中文) • Korean (한국어) • Lao/Laotian/
Phaasaa Lao (ລາວ) • Oomiffa • Russian
(русский язык) • Somali/af Soomaali • Spanish
(Español) • Šigalog • Thai (ภาษาไทย) • Tigrinya (ትግርኛ)
Vietnamese (Tiếng Việt)

Sharciga Eegitaanka iyo Diwaangelinta Ijaarka (RRIO)

Hagaajinta iyo ilaalinta guryo ammaan iyo caafimaad u leh dhammaan Kireystayaasha Seattle

WAA MAXAY SABABTA UU GURIGAYGU UGU BAAHAN YAHAY KORMEERKA?

Joogtaynta helitaanka iyo guryo tayada guryo ijaar ah waxay ka caawinayana inay Seattle noqoto meel fiican oo lagu noolaado. Barnaamijka RRIO wuxuu caawiyaa in la hubiyo in guryaha la kireysto ee Seattle lahaadaan ammaan iyo heerarka dayactirka asaasiga ah. Barnaamijka ayaa waxaa loo aasaasay si uu uga badbaadiyo kireystayaasha inay ku noolaadaan guryo dayactir liita.

Si loo hubsado in gurigaaga loo dayactiro si nabadgelyo leh, waxaa laga yaaba in kormeer loo baahdo. Waxaa ka masuul ah milkiilaha hantida ama maamulaha in la sameeyo kormeer.



YAA QABAN DOONA KORMEERKA?

Kormeerka waxaa qaban doona:

- Kormeeraha Magaalada ama
- Kormeere gaar ah oo tababaran oo shaqadiisu ay la socoto Magaaladu



WAA SIDEE KORMEERKU?

Kormeerka RRIO waxa uu si taxadar leh u eega sharuudaha asaasiga ee guryaha. Kormeerahu waxa uu eegi doona waxyaabaha sida:



Aan lahayn godad ama darooshin la arki karo ee saqafka ama darbiyada



Qalabka musqusha sida waji dhaqa ama saxanka musqushu inay shaqeeynayaan



Dariishadaha iyo albaabada in si sax ah u shaqeeyaan oo aamin ahaadaan



In nidaamka kululaynta si joogto ah lagu rakibay, oo uu shaqeeynayo

Kormeerka *ma* aha inaad fiirinaysa hantidaada, sida aad ku nooshahay, ama waxa aad ku sameeyso meesha aad ku nooshahay.

Waxaad ka eegi kartaa liiska kormeerka oo buuxa www.seattle.gov/RRIO.



Kormeeraha RRIO ayaa:

- Eegi doona dhammaan qolalka dhismaha
- Eegi doona meelaha dibedda
- Waxaa laga yaaba inuu eego saxanka hoostiisa ama alaabta gogosha xageeda danbe



Kormeerka RRIO *ma* uu:

- Baari doono hantidaada shaqsiga
- Ma eegi doono qaanadahaada ama alaabtaada kale
- Kuma uu weydiin doono xaaladaada ama howlahaada sharciga



SIDEE AYAA U SHAQEeya KORMEERKU?

1 OGAYSIIIN

Waa in aad hesho ogeysiis ugu yaraan laba maalmood ka hor kormeerka ka milkiilaha hantida ama maamulaha.

Waa in aad kala shaqeeyso qorshe ah meesha milkiilaha hantida ama maamuluhu ka soo galayo gurigaada. Sida ku cad sharciga Magaalada iyo Gobolka uguma aad diidi kartid si aan macquul ahayn gelitaanka kormeerka.

2 DIYAARI

Horay ugu sii sheeg milkiilaha hantida ama maamulaha guriga wax kasta oo u baahan in la hagaajiyo.

Hubso inuu kormeeruhu geli kara dhammaan unugyada guriga. Meel geli wixii hanti shaqsiyadeed ah ee aad doonaysa inaan la arag.

3 GELITAANKA

Maalinta kormeerka, hubso inuu kormeeruhu soo geli karo gurigaaga.

Adigay ku jirtaa haddii aad joogayso inta uu kormeerku socdo iyo in kale.

4 NATIIJADA

Milkiilaha hantida iyo maamulaha ayaa la soo ogaysiin doona natiijada kormeerka. Waxaad ka eegi kartaa haddii gurigaasi uu ka gudbay kormeerka www.seattle.gov/sdci. Ku qor ciinwaankaaga qeybta "find Status and Activity" (hel Heerka iyo Waxqabadka).

Haddii ay jirto dhibaato ah kormeerka, ama dayactirka ama arrin amaanka la xariirta oo la hilmaamay, waxaad u sheegi kartaa milkiilaha guriga ama maamulaha, ama waxaad ka soo wici kartaa barnaamijka RRIO **(206) 684-4110**.

